



Ka bilow sannadka 2024 waxaa ku cusub Brograamka Tallaalka Dowliga: ka hor tagga fiiruska-rot

## **Carruurta dhalaneysa wixii ka bilowda 1 jannaayo 2024 waxaa ay heli karaan tallaalka ka hor tagga fiiruska-rot**

### **Waa maxay fiiruska-rot?**

Fiiruska-rot waxaa uu keenaa infekshanka caloosha iyo xiidmaha(micidhirka). Ilmaha yaryar ayeey inta badan ku dhacdaa. Carruurta qandho ayaa qabaneysa, shuban (daran), labalabo ayaa qabaneysa waana ay matagayaan.

### **Is qaadsiinta (faafista)**

Fiiruska-rot waa mi si aad ah u faafa. Waxa uu ku jiraa saxarada dadka qaba. Marka musqusha la tago waxa uu fiiruska ku haraa saxanka musqusha daboolkeeda, tubada biyaha ama gacan qabadka albaabka amaba agabka ciyaarta ee carruurta. Sidaa ayuu fiiruska gacamaha u gaari karaa loona sii gudbin karaa.

### **Cisbitaal dhigista**

Carruurta marka ay wakhti dheer si daran ay u shubmaan waa ay fuuq baxayaan waana in cisbitaal la dhigaa. Taasi waxay ku dhacdaa sannad kasta qiyaastii carruur dhan 3.500. Sannad kasta 5-6 carruur ah ayaa u dhinta saameynta fiiruska-rot.

### **Mudda uu jiray tallaalka**

Fiiruska-rot muddo badan ayuu jiray ka soo bilow sannadka 2006 waddamo badan ayaa adeegsada tallaalka fiiruska-rot. Halkaasi oo dhigista cisbitaal ay aad hoos ugu dhacday.

### **Dhibco**

Tallaalka waa dareere ku jira tubbo yar. Carruurta dareerahaas ayaa afka loogu dhibcinayaa. Taasi waxay ka dhaceysaa xafiiska la talinta carruurta. Carruurta waxaa dhibcahaas la siinayaa agagaarka marka ay jiraa 6-9 usbuuc mar kalena marka ay jiraan da' u dhow 3 bilood jirka.

### **Hawlgal dheeraad ah**

Sida tallaalka kasta waxaa dhici karta in hawlgal dheeraad ah uu keeno. Carruurta wacnaan ma dareemaayaan waxaan ku dhici kara wax yar oo shuban ah. Waa mid aan aad u darneyn wax yar ayuuna jirayaa marka loo eego cabashooyinka uu fiiruska dhaliyo. Waxaa jiri kara hawlgallo dheeraad ah (dhif ah) oo ku yallo website-ka Brograamka Tallaalka Dowliga. Hawlgallo dheeraad ah oo daran waa dhif. La xiriir dhakhtarka qooyiska haddii ilmahaada uu aad ugu xanuunsado tallaalka.

Ogaashada dheeraad ama afaf kale? Ka eego:

<https://rijksvaccinatieprogramma.nl/translations-letters-brochures-about-vaccinations-and-infectious-diseases>

RIVM

A. van Leeuwenhoeklaan 9  
3721 MA Bilthoven  
Postbus 1  
3720 BA Bilthoven  
[www.rivm.nl](http://www.rivm.nl)

T +31 88 689 8989  
[info@rivm.nl](mailto:info@rivm.nl)